

Hadda lagu heli karo Hmong, Karen,
Soomaali iyo Isbaanish!

Laga bilaabo Sebtembar

2025

ilaa Abriil 30, 2026

XEERARKA UGAARSIGA SHIMBIRAHA BIYAHA EE MINNESOTA



m DEPARTMENT OF
NATURAL RESOURCES

Buug-yarahan waxa uu daboolayaa xeerarka aasaasiga ah ee ugaarsiga shimbir-biyoodka ee Minnesota. Ma aha liis dhammaystiran ee dhammaan sharciyada ugaarsiga mana aha dukumeenti sharci ah.



Nidaamka CUSUB
ee Shati siinta
Elektarooniga ah
ayaa dhawaan
soo baxaya
Fiiri bogga 4.

UGAARSATADA SHIMBIRAHHA-BIYAHHA



Ugaadhsadayaasha mustaqbalka aadiga ayay ku tiirsanaan doona si looga hortago faafitaanka noocyada dulaanka biyaha ku dhaca... qaybtaada ka qaado.

- ✓ KA NADIIFI Dhirta biyaha xayawaanka iyo dhoobada oo laga helo dhamaan qalaabka, doomaha, dharka, eeyaha yo gawaarida.
- ✓ KA DAADI dhamaan biyaha doomaha iyo qalabka oo ka tag tuubbooyinka bullaacadda markad wax daabulayso.
- ✓ QALAJI wax walba ugu yaraan 5 maalmood kahor ugaarsiga biyaha kale.


Wax badan ka ogoow mndnr.gov/ais

JADWALKA MAWDUUCYADA

Nidaamka Shati siinta Elektarooniga ah	4
Macluumaadka Shatiga	6
Barnaamijka Macluumaadka Ugaarsiga	7
2025 Taariikhaha Xilliga Ugaarsiga	9
Xiliga caadiga ah ee ugaarsiga boolada goose.....	10
Ugaarsiga Dhalinyarada	12
Xiliga ugaarsiga Sandhill Crane	13
Xeerarka Guud Ee Shimbiraha-Biyaha	16
Aagagga Quudashada iyo Nasashada ee Waterfowl (Shimbiir-biyoodka)	
Geediga ah	19
Booloboolooyinka iyo Geeska la Sawiray ee Minneosta	21
Daaha la Isticmaali Karo ee Ugaarsadayasha Leh Xaddidnaanta Socodka ...	27
Xeryaha Gobolka Waxay U Furanyihiin Ugaarsiga Goose	27
Soo Koobida Xeerarka Federaalka.....	30
Saacadaha Toogashada.....	32

Shaabada boolonboollada Gobolka Minnesota

Lacagaha llaga aruuriyay iibinta shaambadaha boolonboollada ee gobolka Minnesota ayaa lagu bixin doona cilmi baarista Shimbiraha biyaha, maaraynta iyo degaan ahaan taas oo hagaajinaysa xaaladaha dadka gobolka deggan iyo shimbiraha so hijrooday.



Rinjiyeynta boolada ciyeysa (Cackling goose) oo uu sameeyey Kurt Kegler, Mankato, Minnesota.

Sawirka jeldiga ee ugu muhimsan waxaa keenay Maktabada R3 Community Asset Library. Sawirka jeldiga ee deegaanka waxaa qaaday Tyler Kiehm. Sawirka boolada ciyeysa (Cackling goose) waxaa qaaday George Gentry, USFWS.

Sawirada Shimbiraha-biyaha ee bogagga 21-26 ee laga helo Aqoonsiga *Waterfowl* ee Richard LeMaster, Buugaagta Stackpole. www.stackpolebooks.com. Waxaa lagu isticmaala ogolaansho.

Daabacaaddan waxaa qayb ahaan lagu maalgeliyaa dakhliga xayeysiinta. Gobolka Minnesota iyo Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ma dammanad qaayaan badeecooyinka ama adeegyada la xayeysiyay mana qaadaan wax masuuliyad ah ee ka dhasha isticmaalka alaabooyinkan ama adeegyadan.



Nidaamka Shati siinta Elektarooniga ah

Saamaynta Nidaamka Shati siinta Elektarooniga ah (ELS)

Cusbooneysiinta lagu samaynayo nidaamka shati siinta elektarooniga ah waxay saamayn doontaa hababka iibsashada shatiga, diiwaangelinta, ansaxinta/sumaddaynta, iyo dhibcaha bakhtiyaanasiibka aad doorbidayso.

Macluumaadka ku jira buuggani **waa sax xilliga la daabacay**. Si kastaba ha ahaatee, ELS-ka cusub ayaa laga yaabaa inuu si toos ah u dhaqan galo daabacaadda kadib. Marka uu dhaqangalo, ELS-ka cusub waxa uu saamayn doonaa hababka iibsashada shatiyada, ansaxinta, diiwaangelinta ugaarta la soo ugaarsaday iyo gelitaanka meelaha bakhtiyaanasiibka aad doorbidayso.

Sideen ku ogaan karaa in ELS-ka cusub uu hadda shaqaynayo?

Si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyey, ka tixraac ilaha khadka internetka iyo macluumaadka xiriirka ee hoos ku taxan.

Wax badan ka baro websaydkeena

Si aad wax badan uga ogaato isbeddeladan soo booqo [MNDNR.gov/elsinfo](https://www.mndnr.gov/elsinfo) ama iskaangarayso QR koodhka hoose.



Su'aalo Dheeraad ah?

Haddii aad qabto su'aalo, fadlan ka soo wac Xarunta Macluumaadka DNR 888-MINNDNR (646-6367) ama 651-296-6157.

*CUSUB 2025

- Cusbooneysiinta buuga xeerarka: Isbadaladani waxay wanaajin doonaan waayo-aragnimada dadka isticmaalaya iyo u fududaynta. Abaabulka iyo soo bandhigida nuxurka waxa la soo cusboonaysiin doonaa 2025 iyo 2026.
- White Earth Reservation, Leech Lake Reservation, iyo Mille Lacs Band of Ojibwe waxay leeyihiin hagitaan gaar u ah oo loogu talagalay ugaarsiga xilliga hore ah ee teal laga ugaarsado gudaha xuduudaha qabaa'ilka. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, fiiri bogga 9.
- Sora iyo Virginia rails waxa la ugaarsan karaa laga bilaabo Sebtembar 1 ilaa Noofambar 9. Faahfaahinta ka fiiri bogga 12.
- Wilson's Snipe waxa la ugaarsan karaa laga bilaabo Sebtembar 1 ilaa Diisambar 16. Faahfaahinta ka fiiri bogga 12.

MAKE YOUR OWN WILD GAME SUMMER SAUSAGE AND SALAMI.

WE HAVE EVERYTHING YOU NEED TO PROCESS
YOUR MEAT INTO DELICIOUS SAUSAGE
RIGHT IN YOUR OWN HOME.



**COMPLETE KITS
STARTING AT \$13.95**



Butcher & Packer Supply
P.O. Box 71748
Madison Heights, Michigan 48071

Call 1-800-521-3188
www.butcher-packer.com



Paid Advertisement



TAAGEER DADKA KA SHAQAYNAYA INAY DHALINYARADA DIBADA DEEGAANKA U SOO SAARAAN

Deeqdaada aad siiso No Child
Left Inside waxay siisaa deeqo
barnaamijyada caawiya carruurta
inay soo bartaan dibadda.

Wax badan ogoow
oo deeq bixi maanta:



m DEPARTMENT OF
NATURAL RESOURCES

mndnr.gov/kidsoutdoors

FAW_0056_2022

MACLUUMAADKA SHATIGA



ELS-ka cusub ayaa laga yaabaa inuu dhaqangalo kahor xilliga ugaarsiga ee 2025. Marka uu dhaqangalo, waxay saamayn doontaa hawlaha boggan. Faahfaahinta ka fiiri bogga 4.

Guud

Ugaarsatada shimbiraha biyaha ee degaanka degan iyo kuwa aan deganayn ee jira 16 sano ama ka weyn waa inay haystaan mid ka mid ah shatiyadan soo socda. (Qiimaha kuma jiraan kharashyada soo saarista ee dheeraadka ah.)

Shatiga	Da'da	Qiimaha
Ugaadha Yar ee Deganaha Degaanaha Weyn	65 iyo ka weynr	\$13.50
Ugaadha Yar dallinyaradha Degganaha	16 iyo 17	\$5
Ugaadha Yar ee Degganaha	18 ilaa 64	\$22
Ugaadha Yar ee 72-saac ee Degganaha	18 ilaa 64	\$19
Isboortiga Shaqsiyeed Degganaha	18 iyo ka weyn	\$41
Isboortiga Isku-darka Degganaha	18 iyo ka weyn	\$57
Isboortiga sare Shakhsiyeed ee Degganaha	18 iyo ka weyn	\$100
Isboortiga sare Isku-darka ee Degganaha	18 iyo ka weyn	\$126
Ugaarsiga Ugaarta Yaryar ee Noloshada oo dhan ah ee Dadka Degaanka ah		Qiimuhu da'da ayuu ku kala duwanyahay
Ugaarsiga Ugaarta Waaweyn ee Noloshada oo dhan ah ee Dadka Degaanka ah		Qiimuhu da'da ayuu ku kala duwanyahay
Ugaadha Yar Ee dallinyarada ee Aan Degaanka aheyn	16 iyo 17	\$5
Ugaadha Yar ee 72-saac ee Degaanka aheyn	18 iyo ka weyn	\$75
Ugaadha Yar ee Degaanka aheyn	18 iyo ka weyn	\$102

Halkee baan ka iibsana karaa shatiga ama shaambadaynta?

Waxda Khayraadka Dabiiciga ah ee Minnesota ayaa ka bixisa shatiyada goobaha wakiilladu u joogaan ee Minnesota oo dhan - dukaamada alaabada isboortiga, dukaamada sahayda ugaarsiga iyo kalluumaysiga iyo qaar ka mid ah dukaamada tafaariiqda.

Ansaxinta shaambada federaalka ee shimbir-biyoodka geediga ah ayaa laga heli doonaa dhammaan iibiyeyaasha shatiga elektarooniga ah. Ogolaanshaha elegtarooniga ah ee shaambada federaalku waxay shaqaynaysaa xilliga ugaarsiga oo dhan. Shaabada sawirada leh waxaa boostada loogu diri doona dadka iibsada kadib marka ay xirmaan xilliyada ugaarsiga shimbir-biyoodka.

Sidee ayaan ugu iibsana karaa shatiga khadka internetka ama telefoon?

Shatiga waxaa laga iibsana karaa websaydka DNR ee ah mndnr.gov ama iyada oo la soo wacayo 888-665-4236. Khidmad dheeraad ah oo u fududaynta ah ayaa lagu daray iibka loo marayo internetka ama taleefanka.



ELS-ka cusub ayaa laga yaabaa inuu dhaqangalo kahor xilliga ugaarsiga ee 2025. Marka uu dhaqangalo, waxay saamayn doontaa hawlaha boggan. Faahfaahinta ka fiiri bogga 4.

Shaambada iyo ansixinta qofka tababarasho ahaan ula socda qof ugaarsanaya

Shaababada ansixinta shatiga ugaarsiga shimbir-biyoodka geediga ah ee gobolku waa sharci ku ugaarsiga iyada oo aan la haysan shaambada sawirka ah. Dadka iibsanaya ayaa codsan kara shaambada sawirka ikhtiyaariga ah iyaga oo bixinaya khidmad laakiin loogama baahna si ay u ugaarsadaan.

Ansixinta qofka tababarasho ahaan ula socda qof ugaarsanaya waxay diyaar u tahay dadka deegaanka iyo kuwa aan degaanka ahayn ee sida caadiga ah looga baahan lahaa inay haystaan shahaadada badbaadada hubka si ay u ugaarsadaan ugaarta yaryar ama deerada. Faahfaahin ka hel *Xeerarka Ugaarsiga iyo Dabin Dhigashada ee Minnesota*.

Shahaadada badbaadada hubka

Haddii aad dhalatay kadib Diisambar 31, 1979, waxaad u baahan doontaa mid ka mid ah kuwan soo socda si aad u hesho shati si aad hub ugu ugaarsato xayawaanka duurjoogta ah gudaha Minnesota:

- Shahaadada Badbaadada Hubka
- Ansixinta Qofka Tababarasho ahaan u Ugaarsanaya
- Shatiga ugaarsiga oo hore oo leh calaamada badbaadada hubka, ama
- Caddaynta dhamaystirka koorsada badbaadada ugaarsadaha

BARNAAMIJKA MACLUUMAADKA UGAARSIGA



Macluumaadka ku saabsan sida loo qaato shahaadaynta HIP ee ELS-ka cusub ayaa laga heli karaa khadka internetka. Fiiri bogga 4

Kahor intaadan ugaarsan shimbir-biyoodka ama shimbiraha ugaarta geediga ah (marka laga reebo sandhill cranes), waa inaad haysato shahaadaynta Barnaamijka Macluumaadka Ugaarsiga (Harvest Information Program - HIP). Markaad iibsanayso shatiga, dhex "haa" haddii aad qorsheyneyso inaad ugaarsato shimbiraha geediga ah. Haddii aad illowdo, waxaad weli ku heli kartaa shahaadaynta kadib markaad ku hesho rasiidka HIP khadka internetka ama telefoon. Shatigaaga waxa ku qornaan doonta "HIP Certified," oo waa in aad haysato marka aad ugaarsanayso.

Waa Maxay HIP?

Saynisyahannada shimbir-biyoodka ee DNR iyo U.S. Fish and Wildlife Service ayaa waxay isticmaalaan macluumaadka HIP si ay u sameeyaan qiyaaso sax ah oo ku saabsan dhammaan shimbiraha geediga ah ee laga soo ugaarsado dalka oo dhan.

UGAARSATADA SHIMBIRAHA GEEDIGA AH: HA DHAAFIN HIP

Barnaamijka Macluumaadka Ugaarsiga (Harvest Information Program - HIP) waa xaqiijin sharci ahaan looga baahan yahay ugaarsadaha soo ugaarsada shimbiraha geediga ah taas oo ka caawisa bayooloojistaha inay maamulaan shimbiraha geediga ah.



mn
DEPARTMENT OF
NATURAL RESOURCES

Shimbiraha ugaarta geediga ah waxaa ka mid ah booloboolada (ducks), boolada biyaha/geese, brant, swans, doves, qoolleyda band-tailed pigeons, cranes, rails, coots, gallinules, woodcock, iyo snipe.



fws.gov

FAW_0003_25

2025 TAARIKHAHA XILLIGA UGAARSIGA

Saacadaha toogashada

Saacadaha toogashada ee sandhill crane, rail, snipe, boolada ducks, coots, moorhens, mergansers iyo geese waa ½ saac kahor qorrax soo baxa ilaa ay qorraxdu ay ka dhacdo inta lagu jiro xilliga oo dhan (marka laga reebo inta lagu jiro xilliga teal marka saacadaha toogashada ee teal ay bilaabmaan qorrax-soo-baxa).

Xaddiga ugu badan ee la haysan karo

Xadka haysashada ee dhammaan shimbiraha hijrooda waa 3 laab xadka maalinlaha ah.

Xiliga Ugaarsiga teal (gobolka oo dhan)

Noocyada Noolaha	Taariikhaha xilliga ugaarsiga	Xadadka Maalin Kasta
Teal Blue-winged, green-winged iyo bunni (cinnamon)	Sebtember 6-10 gobolka oo dhan	6 (Teal Blue-winged, green-winged iyo bunni cinnamon oo la isku daray)

Saacadaha toogashada ee xilliga ugaarsiga teal waa qorrax soo baxa ilaa qorrax dhaca. Ogow in tani ay ka duwan tahay xilliyada ugaarsiga kale ee shimbir-biyoodka (waterfowl).

*CUSUB—Xayiraadaha toogashada xilliga hore ee ugaarsiga teal

Xayiraadaha ugaarsiga xilliga hore ee teal (Sebtembar 6-10) waxay ka dhacaan gudaha Mille Lacs Indian Reservation, Leech Lake Reservation, iyo White Earth Nation Reservation. La xiriir maamulada qabaa'ilka kala duwan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

- Gudaha soohdimaha Mille Lacs Indian Reservation, ugaarsiga teal inta lagu jiro xilliga hore ee ugaarsiga teal waa ka mamnuuc ugaarsiga teal sariiraha lagu beero bariiska duurjoogta ah ee ay u calaamadaysay maamulka qabaa'ilku in laga goosto bariiska. Mille Lacs Band of Ojibwe: <https://millelacsband.com> ama 320-532-7896.
- Gudaha soohdimaha Leech Lake Reservation, ugaarsiga teal inta lagu jiro xilliga hore ee ugaarsiga teal waa ka mamnuuc in laga ugaarsado meel u jirta 1/2 mayl sariiraha lagu beero bariiska duurjoogta ah ee ay u calaamadaysay maamulka qabaa'ilku in laga goosto bariiska. Leech Lake Band of Ojibwe: <https://llojibwe.org/drm/> ama 218-368-4767.
- Gudaha soohdimaha White Earth Reservation, ugaarsiga teal inta lagu jiro xilliga hore ee ugaarsiga teal waa ka mamnuuc in laga ugaarsado biyaha bariiska duurjoogta ah ee ay aqoonsadeen maamulka qabaa'ilku. White Earth Nation: <https://whiteearth.com>, 218-935-3933 (xafiiska), ama 218-850-8035 (moobil).

Boolada Duck, coot, moorhen iyo merganser

Taariikhaha xilliga ugaarsiga	Noocyada Noolaha	Xadadka maalin kasta
Aagga Waqooyi Sebtember 27 - Nofeembar 25	Boolada	6
	Coot iyo moorhen (gallinules)	15
	Merganser	5 (wax aan ka badnayn 2 ayaa ahaan kara mergers madax daboolan (hooded mergansers))
Aagga Dhexe Sebtember 27 - Oktoobar 5; Oktoobar 11 - Nofeembar 30	Boolada	6
	Coot iyo moorhen (gallinules)	15
	Merganser	5 (wax aan ka badnayn 2 ayaa ahaan kara mergers madax daboolan (hooded mergansers))
Aagga Koonfur Sebtember 27 - Oktoobar 5; Oktoobar 18 - Diisambar 7	Boolada	6
	Coot iyo moorhen (gallinules)	15 midkiiba
	Merganser	5 (wax aan ka badnayn 2 ayaa ahaan kara mergers madax daboolan (hooded mergansers))

Xadka inta ugu badan ee la ugaarsan karo noocyada boolada duck

Haddii aan liistada lagu qorin, ilaa 6 boolada duck ah ayaa laga yaabaa in la ugaarsado maalin kasta ilaa laga gaarayo xadka haysashada ee ugu sarreeya.

Xadka maalinlaha ah ee Scaup (bluebill) waa 1 ilaa laga gaarayo Oktoobar 11 ee aagga woqooyi, ilaa laga gaarayo Oktoobar 16 aagga bartamaha, iyo illaa laga gaarayo Oktoobar 23 aagga koonfureed. Wakhtigaas wixii ka dambeeya, xadka maalinlaha ahi waa 2 scaup maalintii ilaa inta ka hartay xilliga ugaarsiga ee aag kasta.

Xadka maalinlaha ah ee boolada duck waxa ku jira wax aan ka badnayn mid kasta oo ka mid ah noocyada boolada duck soo socda: 4 mallards (2 dhedig mallards), 3 wood ducks, 2 redheads, 2 canvasbacks, 2 black ducks, 2 pintail, scaup (bluebill) xaddid wuxuu ku xiranyahay taariikhda.

Xiliga caadiga ah ee ugaarsiga boolada goose

Taariikhaha xilliga ugaarsiga	Noocyada Noolaha	Xadadka maalin kasta
Aagga Waqooyi Sebtember 27 - Diisambar 26	Canada, white-fronted iyo brant	5 la isku daray
	Snow, blue snow iyo Ross's	20
Aagga Dhexe Sebtember 27 - Oktoobar 5; Oktoobar 11 - Diisambar 31	Canada, white-fronted iyo brant	5 la isku daray
	Snow, blue snow iyo Ross's	20
Aagga Koonfur Sebtember 27 - Oktoobar 5; Oktoobar 18 - Jan. 7	Canada, white-fronted iyo brant	5 la isku daray
	Snow, blue snow iyo Ross's	20

Xilliga ugaarsiga boolada goose ee Sebtembar (gobolka oo dhan)


Taariikhaha xilliga ugaarsiga	Noocyada Noolaha	Xadadka maalin kasta
Sebtember 6 - 21	Canada, white-fronted iyo brant	5 la isku daray
	Snow, blue snow iyo Ross's	20

Ugaahdsiga biyaha dushooda

Inta lagu jiro xilliga Booloboolada goose ee Sabteembar, ugaarsiga biyaha dushooda waa la ogol yahay gobolka oo dhan.

Shatiyada loo baahanyahay

Ogolaansho gaar ah looma baahna si loo ugaarsado Xilliga ugaarsiga boolada ee Sebteembar. Ugaarsatadu wali waxay u baahan yihiin shatiga ugaarsiga xayawaanada yar-yar, shaambada shimbir-biyoodka ee gobolka, shaambada federaalka ee boolada (duck), iyo shahaadaynta HIP. Ka fiiri boggaga 6-7 shuruudaha looga baahanyahay.



Xiliga Ugaarsiga Boolaboolada Snow Goose

(Tallaabada Ilaalinta Boolada Light Goose)

Minnesota waxay mar kale qorshaynaysaa in ay ka qaybqaadato ficilka ilaalinta light goose conservation action ee iskaashatada bilaha Feebaraayo, Maarso iyo Abriil 2026. Tallaabadan ayaa la qaadayaa iyada oo la isku dayayo in la dhimo tirada xad dhaafka ah ee boolada snow geese oo khatar gelinaya deegaankooda taranka. Dhammaan ka qaybgalayaashu waa inay haystaan Ruqsadda Light Goose Conservation Permit oo ay wataan marka ay isku dayayaan inay ugaarsadaan boolada light geese.

Shimbiraha kale ee geeddiga ah

Noocyada Noolaha	Taariikhaha xilliga ugaarsiga	Xaddiga maalinlaha ah	Xaddiga ugu badan ee la haysan karo
Mourning doves	Sebt. 1 - Nof. 29	15	45
Woodcock	Sebt. 20 - Nof. 3	3	9
Sora iyo Virginia rail	Sebt. 1 - Nof. 9	25 la isku daray	75 la isku daray
Common snipe (Wilson's)	Sebt. 1 - Dis. 16	8	24
Sandhill crane (Aaga Sandhill Crane kaliya)	Sebt. 13 - Okt. 19	2	6

Xilliga ababarka khaaska ah

Saacadaha ugaarsiga waa ½ saac kahor qorrax soo baxa ilaa qorrax dhaca.

Noocyada Noolayaasha	Taariikhaha xilliga ugaarsiga	Xaddiga maalinlaha ah	Xaddiga ugu badan ee la haysan karo
Boolada duck, coot, mergansers, moorhen (Gallinules), iyo booloboolo geese	Aagga Waqooyi Sebtember 27 - Oktoobar 25 Diisambar 13 - Janaayo 21		
Boolada duck, coot, mergansers, moorhen (Gallinules), iyo booloboolo geese	Aagga Dhexe Sebtember 28 - Oktoobar 5; Oktoobar 11 - Nofeembar 30; Diisambar 13 - Janaayo 21	3 DHAMMAAN Shimbiraha geeddiga ah oo la isku daray	9 DHAMMAAN Shimbiraha geeddiga ah oo la isku daray
Boolada duck, coot, mergansers, moorhen (Gallinules), iyo booloboolo geese	Aagga Koonfur Sebtember 27 - Oktoobar 5 Oktoobar 18 - Diisambar 7 Diisambar 13 - Janaayo 21		
Woodcock, sora, rail, doves iyo snipe	Sebtember 1 - Diisambar 16		

UGAARSIGA DHALINYARADA

Sebtembar 13 - 14, 2025, ugaarsatada shimbiraha biyaha ee da'doodu tahay 17 iyo wixii ka yar, marka ay weheliyaan qof weyn oo aan ugaarsanaynin (da'da 18 iyo ka weyn) waxay qaadan karaan/ugaarsan karaan booloboolada duck booloboolada geese, mergansers, coots iyo moorhens laga bilaabo ½ saac ka hor qorrax ka soo baxa ilaa qorrax dhaca.


- Xadka maalinlaha ah wuxuu la mid yahay xilliyada booloboolo duck iyo booloboolada goose ee caadiga ah.
- Ugaarsadayaasha da'doodu tahay 13 ilaa 17 waa inay haystaan shahaadada amniga hubka ama ansaxinta ugaadhsadaha tababarka oo ay haystaan.
- Looma baahna shatiga ugaarsiga ama shaambada shimbir-biyoodka ee gobolka, marka laga reebo dhammaan dhalinyarada da'doodu tahay 16 iyo wixii ka weyn waa inay haystaan Shaambada federaalka ee ugaarsiga boolada duck (Federal Duck Stamp).
- Dhammaan xeerarka kale ee ugaarsiga shimbiraha hijroodo ayaa khuseeya.

XILIGA UGAARSIGA SANDHILL CRANE

Noocyada Noolaha	Xilliga	Xaddiga maalinlaha ah	Xaddiga ugu badan ee la haysan karo	Saacadaha toogashada
Sandhill Crane (Aagga Sandhill Crane Zone keli ah)	Sebteembar 13 - Oktoobar 19	2	6	½ saac kahor qorrax soo baxa ilaa qorrax dhaca

- Shatiga: ugaarta yaryar
- Shaabadayn: looma baahna
- Ogolaanshaha ugaarsiga Sandhill Crane (\$3): dhammaan ugaarsadaha
- Rasaas aan sun ahayn ayaa loo baahan yahay

Aagga Sandhill Crane Zone



Ka Fogoow Faafinta Noocyada Duullaanka

Waa sharci darro in la raro dhirta biyaha ka dex baxdo, zebra mussels, carsaanyo ama noocyada dullanka kale ee la mamnuucay ee gudaha ama dibada doonyaha, isjiidka, ama qalab kale sida decoys iyo waders. Ugaarsadayaasha shimbiraha-biyaha waxay isticmaali karaan dhirta biyaha ka soo dex baxda, sida cattails iyo bulrushes, oo laga jaray biyaha kor kooda, si logu dhiso dhaahyada ama daboolidda.

- ✓ Ka nadiifi dhirta biyaha ka dex baxda, xayawaanka iyo dhoobada doontaada, isjiidka, afrolka ama kabaha bowdida, tiirarka riixinta, dharka, qurxinta iyo khadadka, eeyaha, iyo ATV ama gaariga xamuulka.
- ✓ Ka nadiifi biyaha oo dhan doomaha iyo qalabka kana tag tuubbooyinka bullaacadaha markaad wax daabulayso.
- ✓ Qalaji Wax kasta qalaji ugu yaraan 5 maalmood ka hor ugaarsiga biyaha kale.

Isticmaal barroosinooyinka dhaldhalaalka ah ee loo yaqaan 'goobo ah, qaabka nalka leh' ama suunka si aad u yarayso dhirbaaxada biyaha.



**NADIIF KU GAL
NADIIF KAGA BAX**

**QOF KASTAA WUU ISUDIWAANGELIN
KARAA SI UU NOQO QOF KU DEEQA
XUBNAHA JIRKA, IL & UNUG**



LifeSource

KU DEEQIDDA XUBNAHA, ISHA IYO UNUGYADA



www.DonateLifeMN.org

**Ka dalbo geedaha
siidhka ah xanaanada
State Forest Nursery**



Geedaha bareroot ee deegaanka asaliga u ah oo tayo sare leh iyo geedo abuur ah oo lagu soo diri karo gurigaaga.

Hel wixii soo cusboonaada adiga isu diiwaangeliya warsidaheena
mndnr.gov/nursery.



mn DEPARTMENT OF
NATURAL RESOURCES


AGY_0164_25

DHIB MIYEU KUGU HAYAAN XAARKA SHIMBIRUHU?

Cawaska la habeyey ee ku fidsan hareeraha biyaha ayaa soo jiita boolada geese dhibka leh waxayna gacan ka geystaan nabaad guurka, biyaha oo wasakhooba, iyo bixitaanka algae.



Dhirta dabiiciga ahi waxay tahay deegaan, waxay shaandhaysaa daadka biyaha, waxayna ka ilaalisaa hirarka biyaha. Si aad wax badan uga ogaato samaynta xeebaha dabiiciga ah soo booqo: mndnr.gov/shorelines



EWR_0040_23

Digniinta Noocyada Duulista Biyaha Maska Qasabadaha

Qasabaddu wuxuu wataa dulin ku dishay kumanaan boolada ducks quus ah iyo cunugyo ku yaal Minnesota. Kalluumaysiga qasabadda waxaa loo wareejin karaa harooyinka cusub ee qalabka ugaarsiga shimbiraha - waxay ku dhejin karaan qalabkaaga, lagu qarin karaa dhoobada, ama waxay ku xirnaan karaan dhirta. Waad ka caawin kartaa kahortaga faafitaanka hajalloka qasabadaha adoo qaadanaya xoogaa daqiiqado ah si aad u hubiso doontaada, marawaxadaha, tiirarka riixista, qurxinta, iyo barroosinooyinka khiyaanada leh kahor intaadan ka bixin marinka biyaha:



- ✓ Ka nadiifi dhirta biyaha, xayawaanka iyo dhoobada dhammaan qalabka, doomaha, dharka, eeyaha iyo gawaarida.
- ✓ Ka tirtiro dhammaan biyaha doomaha iyo qalabka korontada, oo ka tag tuubbooyinka bullaacadda ah wax daabulayso.
- ✓ Qalaji Wax kasta qalaji ugu wanaagsan 5 maalmood ka hor ugaarsiga biyaha kale.
- ✓ Hubi Ciyaaraga ka hor intaadan dib ugu noqon ugaarsiga—qashinka qasabadaha ayaa biyaha ku noolaan kara ka badan 5 maalmood.

Booqo mndnr.gov/AIS wixii macluumaad oo dheeraad ah.

XEERARKA GUUD EE SHIBIR-BIYOODKA (WATERFOWL)

Qeexitaannada

Shimbiraha geediga ah

Booloboolo duck, booloboolo geese, mergansers, coots, moorhens (gallinules), woodcock, rails, snipe, sandhill cranes, iyo mourning doves.

Waterfowl (Shimbir-biyoodka) geediga ah

Booloboolo duck, booloboolo geese, iyo mergansers.

Shimbiraha baal goostay (undressed bird)

Booloboolo duck, ama booloboolo geese ama Shimbiraha Ugaadha hijroodo ee kale oo leh hal baal oo dinac dhammaystiran.

Waxa loo baahan yahay toogashada aan sameeynta lahayn

Waa sharci darro in la qaato booloboolo geese, booloboolo duck, merganser, coots, moorhens, ama sandhill cranes oo leh rasaasta waregan ama iyado qabta wax rasaasta waregan ah oo la haysto. Kaliya rasaasta ay oggolaatay Adeegga Kalluunka iyo Duurjoogta ee Mareykanka ayaa la isticmaali karaa.

Ha toogan swan

labadaba waxaa laga helaa Minnesota mana ahan shimbiraha ugaadha la oggolyahay. Trumpeter swans gabi caafimaad waa cadaan leh biil madow iyo lugaha madow. Waxay miisaankoodu ka badan yahay 25 rodol. Swans dhallinta midabkeedu waa cawl-bunni.

Xadka lahaanshaha maalinta furitaanka

Maalinta furitaanka xilliga ugaarsiga, qofna ma haysan karo wax ka badan xadka maalinlaha ah.

Dib U helidda

Qofkna ma dili karo ama ma dhaawici karo shimbiraha ugaarta geediga ah isaga oo aan samayn dadaal macquul ah in uu soo helo oo uu ku darsado xadka tirada maalinlaha ah.

Isticmaalka biyaha furan

Qofku ma qaadan karo shimbiraha-biyaha hijroodo, coots, ama rails ee biyaha furan illaa qofkaasi yahay:

1. gudaha geedo dabiici ah oo ku filan in uu qayb ahaan isku qariyo dhirta dabiiciga ah (oo ay ku jirto doontiisu), ama
2. erylano ama tooganayo shimbiraha dhaawacmay, ama
3. gudaha webi ama tog aan ka badnayn 100 yard, ama
4. ugaarsiga mid ka mid ah ilaha biyaha soo socda:
 - a) Wabiga Mississippi laga bilaabo buundada Highway 61 ee Hastings ilaa xuduudka lowa: ugaarsiga waxaa laga oggol yahay doomaha taagan oo aan ka badnayn 100 fuudh xeeb kasta, oo ay ku jiraan jasiirado.
 - b) Harada Pepin, Harada Woods, iyo Harada Mille Lacs: ka ugaarsiga biyaha furan iyada oo la saaranyahay doon taagan ayaa loo ogolyahay biyaha.
 - c) Harada Lake Superior: ka ugaarsiga biyaha furan iyada oo la saaranyahay doon taagan ayaa loo ogolyahay biyaha Minnesota ee waqooyi iyo bari ee jasiirada Minnesota/Park Point peninsula.

Doomaha biyaha

- Qofka isticmaalaya biyaha si uu uga soo ugaarsado shimbir-biyoodka geediga ah waa inuu u hogaansamo shuruudaha “Ka Ugaarsiga biyaha furan.” Eeg bogga 16.
 - › Waxaad ka ugaarsan kartaa shimbir-biyoodka geediga ah doonta haddii ay socoto, xiran tahay, xeebta taagantahay, xirantahay, ama lagu wadayo gacaka, seebab, ama ul.
 - › Waxaad ka ugaarsan kartaa shimbir-biyoodka geediga ah doonta matoorka leh ama doon- shiraac ah oo keliya haddii matoorku uu demsanyahay, shiraacyadii la duubay, oo ayna doontu soconin.
- Marka doonlagu safrayo ama aad la joogo goob laga ugaarsanayo, hubka rasaasta waa laga saari karaa galkana laga saari karaa haddii ay doontu leedahay matoor ama shiraac. Hubka waa in laga saaro qasnada oo ay ku jiraan galkooda marka:
 - › Gudaha degmooyinka Anoka, Hennepin iyo Ramsey.
 - › Gudaha xuduudka magaalo ay ku nool yihiin 2,500 ama wax ka badan.
 - › Haddii kale sida ay u xaddideen sharciyada magangalka ugaarta, nal ku iftiiminta ama sharciyada aragtida habeenkii.
- Kuwa soo socda waa shuruudaha jaakada badbaadada ee Minnesota:
 - › Sharciga gobolku wuxuu dhigayaa in carruurta da’doodu ka yar tahay 10 sano ay xirtaan jaakad badbaadada oo si habboon u le’eg inta ay doontu socoto. Socodka macnihiisu waxa weeyaan in ayna si ammaan ah ugu xirnayn meel lagu xiro oo rasmi ah ama aan lagu xirin dekad.
 - › Jaakada badbaadada oo diyaar ah oo la heli karo oo la xiran karo ayaa looga baahanyahay qof kasta oo saaran doonta, tan waxaa ku jira doomaha paddleboards, doomaha paddleboats iyo doomaha shimbir-biyoodka.
 - › Hal Nooca Type IV ee la tuuran karo ah ayaa looga baahan yahay doomaha 16 feet ama ka dheer (marka laga reebo canoes iyo kayaks) waana in isla markiiba la heli karo.
 - › Darawalka wadaya iyo rakaabka saaran foonta biyuhu waa inay xirtaan jaakada badbaadada.
- Inta lagu jiro xilliyada shimbir-biyoodka, kagama tagi kartid doonta ugaarsiga iyadoo aan cidina ilaalinayn biyaha dadweynaha inta u dhaxaysa qorrax dhaca iyo hal saac kahor qorrax soo baxa, aan ka ahayn haddii ay ku xigto dhul gaar oo looyahay oo aad adigu leedahay ama aad maamusho, oo ayna jirto dhir dabiici ah oo ku filan oo qarin kara ugaarsadaha ama doonta.
- Doonta shimbir biyoodku loogama baahna in ay shati haysato marka loo isticmaalo ugaarsiga shimbir-biyoodka.
- Kahor intaadan ka tagin biyaha gobolka, waa inaad ka soo saartaa dhammaan biyaha doonta, godadka noolaha, iyo sagxada doonta adiga oo ka furaya furka kahor inta aanad safrinin doonta iyo qalabka. Marka aad doon ku safrinayso waddooyinka dadweynaha, waa in aad ka furto ama daboolka furka meelaha biyaha laga daadiyo, afafka, ama qalab kasta oo loo isticmaalo in biyaha lagaga soo saaro taangiyada (ballast tanks), sagxada doonta (bilges), iyo godadka noolaha (live wells).

Kooxahaaga ku soo gudbi reportband.gov

Kasta, aqoonyahannada cilmiga bayoolajileyda ee dawladeed iyo heerka federaalka waxay calaamadeeyaan kumanaan shimbiraha biyaha oo leh calaadaha lugaha nambarka. Ugaarsatada soo sheegaya kooxaha soo helay waxay helaan macluumaad khas ah oo ku saabsan meesha iyo goorta la calamadeeyay shimbirta iyadoo la siinayo macluumaad muhiim u ah maaraynta shimbiraha.

Kooxaha waxa lagu soo gudbin karaa khadka reportband.gov

Daaha iyo sanduqa quusa

Ma dhigan kartid gabaadka meel ah biyaha dadweynaha ama dhulka dadweynaha wax ka badan hal saac kahor inta aan la gaarin xilliga ugaarsiga shimbir-biyoodka.

- Waa sharci darro in la uhaarsado shimbir-biyoodka geediga ah, coots, ama rails iyadoo la isticmaalayo sanduuqa la galo ee laga ugaarsado ama gabaad rasmi ah oo ku yaalla biyaha dadweynaha. Sanduuqa la galo ee laga ugaarsado (sink box) waa qaab dhismeed u ogolaanaya ugaarsadaha inuu ku dhuunto biyaha hoostooda. Doonyaha u qaabaysan maaha sanduuqa la galo ee laga ugaarsado (sink box).
- Gabbaadka oo aan la isticmaalaynin ee looga dhulka dadwaynaha guud ama biyaha dadwaynaha waxaa iska leh dadweynaha, ma leh qofkii isagu dhisay. In xoog lagu qaato gabaadka qof kale waa sharci darro.
- Dadka ugaarsanayaa waxay isticmaali karaan dhirta biyaha sida cattails iyo bullrushs, oo laga gooyay biyaha korkooda, si ay u dhistaan gabbaad.

Qalabta muuqaalka ugaarta ah (decoyada)

Ma dhigi kartid qalabta muuqaalka ugaarta ah meel ah biyaha dadweynaha in ka badan hal saac ka hor xilliga furan ee ugaarsiga shimbir-biyoodka.

- Qalabka muuqaalka ugaarta ah lama dhigan karo dhulka dadweynaha ama biyaha dadwaynaha in ka badan laba saacadood kahor saacadaha sharciga ah ee la toogto shimbir-biyoodka.
